

Qadarka Caadiyan La Dallaco

Haddii aad hesho gargaar hoos imanaya Siyaasadda Gargaarka Dhaqaale ee BJC Health (Financial Assistance Policy, FAP), isbitaalku kuguma dallaci karo wax ka badan qadarka caadiyan loo dallaco (Amounts Generally Billed, AGB) dadka leh caymis daboolaya adeegyada la midka ah. Bukaano u qalma gargaarka dhaqaale waxaa loo tixgeliyaa in lagu "dallacay" oo keliya qadarka uu si shaqsi ah mas'uul uga yahay bixintiisa, ka dib marka la dabaqo dhammaan qiimo-dhimisyada (oo ay ku jiraan qiimo-dhimisyada laga heli karo FAP) iyo bixinta caymiska.

BJC waxay go'aamisaa AGB iyadoo ku dhufaysa khidmadaha guud ee isbitaalka ee daryeelkaas hal ama ka badan boqolkiiba khidmadaha guud, oo loo yaqaan "boqolleyda AGB." Boqolleyda AGB waxaa sanadkiiba la xisaabiyaa iyadoo la qaybinayo wadarta buuxda ee dhammaan dalabaadka isbitaalka ee ay oggolaadeen caymisyada caafimaad muddadii 12-ka bilood ee hore, laguna qaybiyo wadarta khidmadaha guud ee la xiriira dalabaadkaas. Ujeedooyinkan awgood, wadarta buuxda ee ay oggolaato caymiska caafimaadku waxaa ku jira labadaba qadarka

lagu magdhabi doono caymiska iyo qadarka (haddii uu jiro) uu qofku si shaqsi ah mas'uul uga yahay bixintiisa oo ku imanaya qaab wadaag camis, wada-bixin caymis, ama ka-goyn. Xisaabinta AGB waxaa sanadkiiba loo sameeyaa isbitaal kasta.

Marka la oggolaado u-qalmitaanka gargaarka dhaqaale, isbitaalku wuxuu dabaqi doonaa qiimo-dhimista ku habboon ee gargaarka dhaqaale sida lagu sharaxay Jadwalka Dakhliga iyo Qiimo-dhimista Gargaarka Dhaqaale. Haraa kasta oo aad ku leedahay waxaa dib loo eegi doonaa si loo hubiyo inuu ka yar yahay boqolleyda AGB. Haddii haraaga ku waajibay uu ka badan yahay qadarka la oggol yahay ee AGB, qiimo-dhimis dheeraad ah ayaa lagu dabaqi doonaa haraaga si loo yareeyo ilaa boqolkiiba AGB.

Hoos waxaa ku qoran boqolkiiba AGB ee isbitaal kasta oo ka tirsan BJC Health. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan xisaabinta AGB, fadlan wac BJC HealthCare lambarradan 314-362-8400 ama 855-362-8400 ama Saint Luke's lambarrada 816-932-5678 ama 888-581-9401.

Magaca Isbitaalka	Boqolkiiba Qadarka Caadiyan La Dallaco (AGB)
Alton Memorial Hospital	20.6%
Barnes-Jewish Hospital	28.5%
Barnes-Jewish St. Peters Hospital	24.0%
Barnes-Jewish West County Hospital	24.8%
Christian Hospital	21.4%
Memorial Hospital	18.9%
Missouri Baptist Medical Center	26.6%
Missouri Baptist Sullivan Hospital	26.7%
Parkland Health Center–Bonne Terre	24.4%
Parkland Health Center–Farmington	24.4%
Progress West Hospital	26.2%
St. Louis Children's Hospital	43.4%

Saint Luke's Hospitals	Boqolkiiba Qadarka Caadiyan La Dallaco (AGB)
Allen County Regional Hospital	44.85%
Anderson County Hospital	56.14%
Hedrick Medical Center	45.96%
Saint Luke's East Hospital	16.0%
Saint Luke's Hospital of Kansas City	22.1%
Saint Luke's North Hospital	18.4%
Saint Luke's South Hospital	17.6%
Wright Memorial Hospital	49.58%

Waxay dhaqan galaysaa 1, Maarso 2026.